

Helsinki

Adeegyada-dano ilaaliyaha carruurta



Caddeynta aabanimada iyo hooyanimada
Heshiisyada quseeya xannaanada, deegaanka,
xuquuqda la kulanka iyo masruufka cunugga.

Arrimaha aabanimada iyo hooyanimada

Hawlaha dano ilaaliyaha carruurta waxaa ku jira caddeynta aabanimada ama hooyanimada cunugga ku dhashay wax guur ka baxsan.

Sida uu qabo sharciga aabanimadu ninka hooyada qaba ayaa ah aabaha cunugga guurka ku dhasha. Mararka lagu jiro xaaladaha kale waalidku waxay qirashada aabanimada ku sameyn karaan dhalashada cunugga kahor rugta latalintada hooyada ama dhalashada cunugga kaddib dano ilaaliyaha cunugga. Waxaa dano ilaaliyaha carruurta agtiisa lagu qaadi karaa saamiga hiddosidaha DNA islamarka la caddeynayo aabanimada.

Sida uu qabo sharciga hooyanimadu, hooyada cunuggu waa tan cunugga dhashay. Hooyanimada naag kale waan in markasta si gaar ah loo qirtaa, haddii xittaa ay waalidku isqabeen marka uu cunuggu dhalanayay. Qirashada waxaa lagu sameyn karaa dhalashada cunugga kahor rugta latalinta hooyada ama dano ilaaliyaha carruurta dhalashada cunugga kaddib.

Xafiiska rajistareeshinka ayaa xoojinaya aabanimada ama hooyanimada qirashada ku saleysan.

Dano ilaaliyaha ayaa haddii loo baahdo maxkamadda ka furi dacwad lagu xoojinayo aabanimada/hooyanimada.

Heshiisyada quseeya xannaanada iyo marsuufka cunugga

Dano ilaaliyaha carruurta wuxuu caawimaad ka geystaa sameynta heshiisyada wuxuuna marka la caddeynayo aabanimada/hooyanimada ama marka ay waalidku isfurayaan xoojiyaa heshiisyada quseeya xannaanada, deegaanka, xuquuqda la kulanka iyo masruufka cunugga.

Marka ay timaado xaalad furiin ah waalidku waa in ay ka heshiidaan

- in labada waalid ay wadajir cunugga mas'uul uga yihiin iyo in uu hal waalid oo kaliya uu cunugga mas'uul ka yahay
- waalidka uu cunugga la degayo
- sida uu cunuggu ula tegayaa waalidka meel kale deggan maalmaha shaqada, maalmaha ciidaha ama wakhtiyada fasaxa
- sida baahida masruufka cunugga loogu qaybinayo waalidiinta

Heshhiska shaqeynaya ama go'aanka maxkamadda waxaa lagu beddeli karaa ama lagu sii wadi karaa heshiiska cusub oo dano ilaaliyaha carruurta agtiisa lagu sameeyay.



Macluumaad dheeraad ah:

Aabimada:

www.thl.fi/isyys

www.thl.fi/faderskap

Hooyanimada:

www.thl.fi/aitiys

www.thl.fi/moderskap

Adeegyada dano ilaaliyaha carruurta:

www.hel.fi/www/Helsinki/fi/sosiaali-ja-terveyspalvelut/lapsiperheid-en-palvelut/perheoikeudelliset-asiat/

Tilmaamaha Wasaaradda caddaaladda ee qiimeynta caddadka caawimaadda masruufka:

<https://julkaisut.valtioneuvosto.fi/handle/10024/76043>

Sharciga aabanimada 13.1.2015/11:

www.finlex.fi

Sharciga hooyanimada 20.4.2018/253:

www.finlex.fi

Sharciga xannaanada cunugga iyo xuquuqda la kulanka

8.4.1983/361:

www.finlex.fi

Waa in la xusuustaa:


Wakhti qabsashada (09) 31044 999

Talobixinta (09) 31043 447

Waxaa lagu danaystaa wakhti la qabsaday oo kaliya.

Cinwaanka boostada
Dano ilaaliyayaasha carruurta, SB 8620
00099 MAGAALADA HELSINKI

Cinwaanka boogashada
Vironkatu 2, 4. kerros
00170 HELSINKI



Helsinki

ARRIMAHA BULSHADA IYO CAAFIMAADKA EE HELSINKI
Adeegyada qoyska iyo sooshalka ● Arrimaha sharciga ee qoyska

<https://www.hel.fi/sote/toimipisteet-fi/aakkosittain/perho/lastenvalvojat/>

Facebook: Arrimaha sharciga qoyska ee Helsinki